

Qaybta A.. Fasaxid mas'uuliyad

Qofka hoos ku saxiixan wuxuu si cad u qirayaa in ciyaaraha sbortiga iyo dhaqdhaqaaqyada la midka ah in ay lug ku leeyahiin dhaawacyada halista ee jirka gaarikara wax badan ka wayn kuwa lala kulmo nolol maalmeedka ka qaybgalka ciyaaraha iyo dhaqdhaqaaqayada kale xubnahu waxay qirayaan, mas'uuliyadeedana qaadayaan khatarta asalka ah ee la xiriirta. Addunka kubbada cagta ma aqbalayo mas'uuliyadda mana qaadi doono mas'uuliyad dhawaca, jirada, dhimashada, waxyeellada, khasaaraha, wixii si lama filan ah u dhaco, kharajyada, dib u dhacyada, ama wixii kale oo nidaam darri ka timaado ee ka qayb galka xubin diwaangashan ee dhaqdhaqaaqa ama isticmalka qalabka Kubbada Cagta ee addunka. Qaddarinta, in lagu ogolaaday galidda iyo isticmaalka qalabka kubbada cagta qofka hoos ku saxiixan wuxuu fasaxayaa, ka tanasulaya ka siideynayaa iyo heshiis in uusan dacweyn saraakiisha, maamulayaasha, shaqaalaha, wakiiladda, iyo adeegayaasha kubadda Cagta ama in loo xilsaaro qayb ama dhamaan dhawacyada dacwad kasta ama weydiisasho la xiriirta dhaawac ama dhimasho ku timaado ee xubinta diwaangashan ee burburka hantida haddii sababto dayacaad amaba haddi aysan ahayn inta xubinta diwaangashan ay ku jirto xaruunta kubadda cagta. Waxaa inta dheerad ka ah, qofka hoos ku saxiixan wuxuu amar ku bixinayaa in addunka kubbada cagta isticmaalo magaca xubinta diwaangashan ama sawirro mataalad ah sida(Video, cajalado, sawirro iyo wixii la mid ah).si loo hormariyo barnaamijka kubadda cagta ee addunka. Waliba, xubin walba oo diwaangashan waxay caddeynaysaa sharciga ka qayb galka iyo badbaadada kubbadda cagta ee Addunka waxayna ogoshay in ay raacdo sharciyadaas.

Qaybta B Qiraalka Waalidka ama Qofka waliga ah

Waxaan u idmayaa cunugayga magaciisu kor ku qoran yahay inuu ka qayb galoo dhaqdhaqaaqyada Kubadda cagta waxaana qaadayaa mas'uuliyadda khatar kasta ee ka dhalan karta ama xiriir la yeelan karto ka qayb galka noocaas ah. Sidaa daradeed, waxaan ogolahay in aan ka tanasulo dacwa kasta ee ka hor imaaneysa dhaawica karta badbaado qabo khasaare mustaqbalka qabasho aan waxyeello u lahayn sarakiishiisa, maamulayaashiisa, shaqaalahiisa, wakiiladiisa adeegayaashiisa ama loo xilsaaro lana xiriiriyo dacwad kasta u sameeyay ama magaciisa lagu sameeyay cunuga kor ku qoran taaso ay ku jirto kharajyada la xirira sharciga. Waxaan caddeynayaa in cunugaygu uu caafimaadkiisa wanagsan yahay jir ahaan iyo maskaxhaanba.

Haddi ay dhacdo xaaladda deg deg ee la xiriira caafimadkiisa ayna suurtoobi weydo in si toos la iila soo xiriiro waxaan halkan u fasaxayaa dhaqtarka u qaabishiisan kubadda cagta in uu Ispitaal jiifiyo, ku badbaadiyo dawooyinka ku haboon, in uu amroo in la duro, dhiig lagu shubo, la suuxiyo, la qalo cunugayga magaciisu kor ku xusan yahay.

Waxaan qirayaa wan akhriyay fasaxaan , caddeyntaan, fahmana shuuradaha ku kooban halkan waxaana ogolahay in aan u hogaansamo qodobada oo idil.